## Dooro cisbitaal

### Furnaan cisbitaal doorasho

Wadanka Denmark waxaa ka jira furnaanshaha cisbitaal doorasho. Taas macnaheedu waa in aad si xornimo leh ukala udooran kartid dhammaan cisbitaalladda dowladda iyo qaar ka mid ah cisbitaalladda shaqsiyaal leeyihiin.
Haddii aad doonaysid in aad isticmaashid furnaanshaha cisbitaal doorasho waa in aad la xariirtaa ama abaartaa qaybta ayadda ah ee adigga hadda laguu diray. Dadkaa ayaa ku jideyn karra oo ayagga ayaad ka codsan kartaa in ay warqadahaagga udiraan cisbitaal kalle, halkaas oo adiggu aad dooni lahayd in lagugu daaweeyo.
Haddii aad doonaysid in aad isticmaashid furnaanshaha cisbitaal doorasho waa ráyi wanaagsan in aad cisbitaal doorratid baaritaanka hore hortiis. Cisbitaalka cusubi laga yaabo inuu isaggubba jecel yahay ama doonnayo inuu baaritaanka hore sameeyo/qabto.

Haddii ambulaanso si deg – deg ah ku keento cisbitaal oo halkaa lagu seexiyo/dhigo ayadda oo dhakhtarkaagu usaan ku soo diran waxa ay ambulaansadu ku geynaysaa cisbitaalka ugu sokeeya. cisbitaalkaas baaritaankiisa ka dib waxa aad dooran kartaa cisbitaaladda bulsho weynta ka dhexeeya midkood. Adigga ayaa gaadiidka ku dadaaleysid.

### Baahsanaanta cibitaal doorasho ee furan

Baahsannaanta furan ee cisbitaal doorasho macnaheedu waa in bukaan socduhu dooran karro in ukuurgelid baaritaan loogga qabban karro ama daaweyn ka helo cisbitaal shaqsi leeyahay/shaqsiyaal leeyihiin haddii gobolku kuugu deeqi karin daaweyn ama ukuurgelid baaritaan inta lagu jiro mudo bil ah. Afar shuruudood waa in laga soo baxaa/la buuxiyaa.

- Waa in cisbitaal dowladeed laggaa soo diraa
- Ukuurgelitaanka diritaaneed si ku filan waa ay ucad yahay oo markaa Gobolku uqiimayn karaa in cisbitaal shaqsiyeed sameyn karro baaritaan iyo daaweyn muhiim ah
- Cisbitaalka shaqsiyeed waa inuu kuugu deeqi karaa daaweyn ka deg – degsan daaweynta Gobolku kuugu deeqi karro.
- Waxaa jira heshiis ka dhexeeya Gobolladda iyo Cisbitaalladda shaqsiyeed oo ku saabsan daaweynta

Baahsannaanta furan ee cisbitaal doorsho waa la isticmaali karraa marka taariikhdii ahayd qalitaan daaweyneyd la bedello ama dib loo dhigo. Tixgelin la´aan haddii cisbitaalku kuugu deeqi karo taariikh cusub oo ka horeysa ama udhow taariikhdii asalka ahayd ee la bedellay.

Warqadda ay ku qoran tahay balanta lagguu soo tuuray ayaa fursaddahaagga ku saabsan furnaanta iyo baahsanaanta furan ee cisbaitaal doorasho laguggu ogeysiinayaa.
Xafiiska bukaan socdaha ee loo yaqaan “Patientkontoret” ayaad kala xariiri kartaa arimahaagga ku saabsan baahsannaanta furan ee cisbitaal doorasho.

**Halka aadan ka isticmaali karin baahsannaanta furan ee cisbitaal doorasho?**
Furnaanta cisbitaal doorasho ma isticmaali kartid haddii aadan buuxin afarta shuruudood ee kor ku xusan.

Baahsannaanta furan ee cisbitaal doorasho xitaa ma isticmaali kartid haddii laguu diray meelaha kala ah:

- Waax ama waaxyo (unug) bedelitaan sida Beer, Kelli ama wadne
- Korran noqosho (Madhaleys noqosho)
- Daaweyn ubad helid (dheecaan siin). Qof dheecaan ku filan jirkiisu uu samayn karin, dabaddeedna ufuddeeya uuraysi/rimitaan
- Dib ubad helid (helitaan/siin. Si mar labbaad loogu uuraysto)
- Daaweyn qalab wax maqal
- Daaweyn is qurxin
- Qalitaan lab ama dhedig bedelasho (tusaale nin rabba in loo bedello dumar ama dumar doonaysa in loo bedello nin)
- Degaansho dib ubaanasho (cudur qofka tabartiray/quwad tirray awgiis)

**Gaadiid**
Haddii aad dooratid inaad isticmaashid furnaanshaha ama baahsanaanta furan ee cisbitaal doorasho waa in aad adiggu ku daddaashaa gaadiidka.
Kabitaan waad ka heli kartaa gaadiidka qaybtiisa udhiganta qarashyadda Region Midtjylland waajibka ku ah inay bixiyaan – waa haddii lagugu daaweeyey cisbitaal Region Midtjylland kuu diri lahaa.
La xariir xafiiska gaadiidka "Kørselskontoret" hadii aad su´aal qabtid

**Fursaddahaagga kalle ee ku saabsan Cuduro weerar khatarreed ku ah nafta sida cudurro qoorgooye iyo cudurradda wadnaha qaarkood**

Haddii aad leedahay cudur nafta khatar ku haya sida qoorgooye ama cudur la cadeeyey oo wadne xanuun ah waxa aad xaq uleedahay furnaanshaha iyo baahsanaanta furan ee cisbitaal doorasho. Waxaa kalle oo intaa ka baxsan oo aad xaq uleedahay daaweyn marka la tixraaco qawaaniin qaas ah, kuwaas oo ku saabsan xilliyadda ugu sugitaan badan. Warbixin dheeraad waxa aad ka heli kartaa oo aad ka ogaan kartaa adigga oo la hadla xafiiska bukaan socdaha "Patientkontoret" iyo adigga oo akhrista warqadda isku laaban ee ka hadlaysa xilliyadda ugu sugitaan dheer "Maksimale Ventetider". Warqaddaaas waxa aad ka heli kartaa guddaha cinwaanka ah www.sundhed.dk warqadduse waxa ay ku qoran tahay luqadda deenishka.